QAYBTA CAAFIMAADKA
DADWEYNAHA




# Macluumaadka baaritaanka COVID-19

Haddii aad leedahay astaamaha COVID-19 ama haddii aad u dhawaatay cid qabta COVID-19 14-kii maalmood ee u dambeeyey, waa in lagu baaro iyadoon la eegin xaaladda tallaalkaaga. **Xiriirka dhaw** waxaa loola jeedaa inaad lix fuud u jirsato qof muda 15 daqiiqo ah ama wax ka badan inta lagu guda jiro maalinta, adigoo xiran ama aan xirneyn maaskaro ama waji daboole.

## S: Waa imisa qiimaha baaritaanka COVID-19?

- **Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP)** – Haddii aad leedahay caymiska OHP, baaritaanku wuxuu kuu noqon bilaash. Wax badan kaga ogow OHP halkan ONE.Oregon.gov.
- **Caymiska shakhsi iyo kooxeed** – Shirkadaha caymiska caafimaadka intooda badan way dhaafi doonaan kharash-wadaagyada, caymis-wadaagga, iyo ka goynaha marka la eego baaritaanka COVID-19 qofku astaamaha leeyahay. Haddii aad su’aalo ka qabto daboolka caymiskaaga caafimaadka, la xiriir bixiyaha caymiskaaga caafimaadka. Booqo Qaybta Xeerka Maaliyadeed daboolka caymiskeeda ee bogga baaritaanka COVID-19 oo ah dfr.oregon.gov si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.
- **Dhacdooyinka baaritaanka bulshada oo bilaash ah** – Booqo DoINeedaCovid19Test.com si aad uga baarto dhacdooyin baaritaan Oregon oo dhan.

## S: Haddii si buuxda aan u tallaalanahay, wali miyey tahay inaan isbaaro?

Shaqsiyaadka sida buuxda u tallaalan waa in la baaro haddii ay leeyihiin astaamaha COVID-19 ama u-bayla noqosha la ogyahay ay la yeesheen qof qaba COVID-19.

## S: Goorma ayaan isbaaraa?

Haddii aad u-bayla noqotay qof qaba COVID-19, waa inaad raadsataa baaritaan iyada oo an loo eegeyn xaaladaada tallaalka**. Dadka sida buuxda u tallaalan waa in la baaraa 5-7 maalmood ka dib u-bayla noqoshadii ugu dambeesay. Dadka aan si buuxda u tallaalneyn waa inay is baaraan markay ogaadaan inay xiriir dhow la yeesheen.** Haddii natiijadooda baaritaanka ay tahay mid taban, waa in mar labaad la baaraa 5-7 maalmood ka dib u-bayla noqoshadoodii ugu dambeesay ama haddii ay astaamaha soo baxaan isla markiiba.

**Xiriirka dhaw** waxaa loola jeedaa inaad lix fuud u jirsato qof muda 15 daqiiqo ah ama wax ka badan inta lagu guda jiro maalinta, adigoo xiran ama aan xirneyn maaskaro ama waji daboole.

## S: Sideen u heli karaa goob baaritaan?

- **Caymis ma leedahay?** La xiriir bixiyahaaga daryeelka caafimaadka si aad u hesho goob baaritaan oo kuu dhaw. Bixiyayaasha caymiska intooda badan iyagaa bixiya kharashka baaritaanka COVID-19 ee qofku astaamaha leeyahay iyo daryeelka la xiriira.
- **Isticmaal khariiradda la raadin karo** https://getvaccinated.oregon.gov/#/locator?lang=en si aad u hesho goobta baaritaanka ee kuugu dhow.
- **Baar dhacdo baaritaanka bulshada ah oo bilaash ah.** Booqo DoINeedaCovid19Test.com si aad uga baarto dhacdooyin baaritaan Oregon oo dhan. Waxaad u baahan inaad gujiso “Register” oo aad samaysato xisaab cusub haddii ay tahay markii kuugu horraysay ee aad isticmaalayso bartan. Marka xisaabtaada aad samaysato, waxaad ka qabsan kartaa ballan mid kamid ah dhacdooyinka la muujiyey. Kaddib markii aad xaadirto dhacdadaada, waxaad markaa gali kartaa xisaabtaada si aad u fiiriso natiijooyinkaaga baaritaanka.
- **Wac 211** si aad u hesho caawimo helidda goob baaritaan oo kuu dhaw.

**Had iyo jeer marka hore sii wac kahor inta aadan booqan goobta si aad u go’aamiso helitaanka ballamaha iyo kharashka.**

**Fadlan ha booqan waaxda xaaladda gurmadka si aad baaritaan uga hesho ilaa astaamahaagu u baahan yihiin qiimayn dhakhso ah. Waaxahayaga xaaladda gurmadka culays badan ayaa haysta taasoo ay keentay korodhka COVID-19 ee wakhtigan.**

## S: Waa maxay nooca macluumaadka la qaadayo si baaritaan aan u helo? Miyaa macluumaadkaas lala wadaagi cid kasta?

Maamulaha baaritaanku wuxuu kaa qaadi macluumaadka caafimaadka iyo kuwa shakhsiba. Macluumaadkaasi iyo natiijooyinka baaritaanka waxa ururiya Qaybta Caafimaadka Dadwaynaha Oregon waana qarsoodi. Natiijooyinka sheegaya in qofka laga helay waxa loo sheegaa caafimaadka dadwaynaha si ay uga war hayaan.

## S: Maxaa dhacaya haddii la iga helo COVID-19?

Bixiyahaaga daryeelka caafimaad iyo shaqaalaha caafimaadka dadweynaha ayaa ku siin doono macluumaad kusaabsan sida looga hortago ku faafinta fayraska qoyskaaga iyo saaxiibadaada. Waxaad u baahan doontaa inaad gaar uga baxdo dadka kale ilaa iyo inta hagitaanka caafimaadka dadwaynuhu sidaas kuu sheegayo. Websaytka SafeStrongOregon.org waxa ku qoran macluumaad dhaqan ahaan habboon oo ku qoran 12 luuqadood, oo ay ku jiraan khayraad loogu talogalay guryeynta, cuntada, daryeelka caafimaadka, daryeelka caafimaadka maskaxda, iyo taageerada maaliyadeed inta qofku karantiilka ku jiro.

**Helitaanka dukumiintiga:** Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir COVID-19 Communications Unit 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us.